

Waa maxay Xeerka READ ?

Xeerka READ waa sharci Colorado ah kaas oo dejiya hagitaanada si loo hubiyo in uu ardaygu dhammaystay fasalka sadexaad akhriska ama ka sareeya heerka fasalka. Waxay ka caawisaa ardayda kuwaas oo u baahan taageero waxbarasho oo dheeraad ah in ay ku akhriyaan heerka fasalka.

Maxuu “ akhriska muhiim ahaan ka hooseeya heerka fasalka” macnaheedu yahay?

Tan macnaheedu waa in ardayga hal sano ama in badan ka hooseeya heerkiisa/keeda fasalka hadda .Daraasadu waxay muujinaysaa in ku akhriska heerka fasalka dhammaadka sanad dugsiiyeedka ay muhiim u tahay guusha dugsiga mustaqbalka.

Waa maxay Qorshaha READ?

Qorshaha READ waa wax ka qabad shakhsiiyeed oo loogu talo galay ardayda dugsiga barbaarinta ee fasalka 3aad ee loo aqoonsaday sidii in ay wax u baranayaan si ka hoosayda heerka akhriska fasalka. Qorshahu wuu sii socdaa ilaa ardaygu gaadho heerka ku wanaagsanaanta akhriska.

Qorshaha READ waxaa loogu talo galay in uu ka caawiyo ilmahaaga in uu u kobciyo sidii akhriste:

- * ***Hadafyo akhriska ah o gaar ah***
- * ***Taageerada waxbarasho ee dugsiga***
- * ***Taageerada guriga***



Dugsiyada Dad waynaha Aurora
Waaxda Sinaanshaha Waxbarashadda
15001 E 1st Ave.
Aurora, Colorado 80011

*Xeerka READ:
Xogta Qoyska*



La rafiiqa dugsiyada iyo qoysaska si loo hubiyo guusha ardayga ee akhriska

Xogtee ayaa ugu muhiimsan?

Hadafkayaga Dugsiyada Dadwaynaha Aurora waxa iska leh DHAMMAAN carruurta si ay uga qalanjebiso dugsi sare diyaar u ah waxbarasho mustaqbal ama xoogsatada. U diyaargaraynta tan ardaydu waxay ka bilaabantaa markay galaan dugsi.

Qiimaynta

Macalinka ilmahaagu waxa uu isticmaalaa Qiimaynta Koboca Akhriska (DRA2) si uu u go'aamiyo ilmo kasta akhriskiisa.

Xogta qiimayntu waxay sheegaysaa in uu ilmahaagu muhiim ahaan u akhriyayo si ka hoosayda heerka fasalka.

Haddii ilmahaagu yahay Bartaha Af Ingriisiga, dhibacaha qiimaynta gobolka (ACCESS) waxay bixisaa xogta ilmaha ee ku saabsan Koboca Af Ingriisiga labbadaba heerarka akhriska iyo heerarka koboca luqadda waxaa looga fekeraa gudaha Qorshaha READ ee Bartayaasha Afka Ingriisiga.

Qorshaha Akhrika waxaa loogu talo galay in uu taageero koriinka shakhsiyeed ee ilamaga ee akhriska.

Taageerada Dugsiga

Macalinka ilmagaaga iyo shaqaalaha kale ee dugsiga ayaa ka wada shaqeeya in ay xushaan farsamooyin iyo wax kaqabad buuxiya hadafyada Qorshaha READ ee ilamagaaga.

Maaha wax ka qabad keliya. Kooxdu waxay sidoo kale eegtaa habab laga dhigayo waxbarashadda fasalka mid ay heli karaan ardaydii oo dhammi.

Taageerada guriga

Waayeelka guriga waa rafiiqyada muhiimka ah caawinta ardayda in ay noqdaan akhristayaan guulaysta, qorayaal iyo wada xidhiidhyaal.

Fadlan la rafiiq macalinka ilmahaaga si loo abuuro oo loo fuliyo qorshaha READ..

Dhammaadka shirarka sanadka iyo wada sheekaysiga dib fasalka ugu celinta

Arday kastaa oo wata Qorshaha READ waxa uu yeelan doonaa shirka dhammaadka sanadka si uu u qiimeeyo qorshaha oo uu wada jir ula shaqeeyo si uu u qorsheeyo sanadka xiga.

Muddada shirka. Ilamahaagu waxa uu wadaagi doonaa ikhtiyaarada ku xidha ilmahaaga baahiyihiisa gaarka ah.

Carruurta qaar waxa dhici karta in ay u baahdaan in sanad ka badan si ay u soo gaadhaan. Sharciyadu waxuu sheegaan in dib u celintu ay noqon karto ikhtiyaar, laakiin waxaa jira wax ka qabadyo kale iyo taageerooyin la heli karo. Daraasadu waxay muujinaysaa in ku celinta heerka fasalku aanay noqon karin xalka ugu fiican xaaladahoo dhan.

Bartayaasha Af Ingriisiga (ELLs): Farsamooyin waxbarasho oo habboon labbada luqaddoodba iyo barashada akhriska iyo qorida waxaa lagu go'aamiyaa taageerada macalinka ku takhasusay barashada Af Ingriisiga. Sharciga Gobolka Colorado ma ku taliyo fasalka dib ugu celin ardayda ku raad jooga kobcinta Af Ingriisiga sidii toodii labbaad ama luqad kale.



Sideen u caawin karaa carruurta guriga?
Waa kuwan fikrado. Macalinka ilmahaagu wuxuu kula wadaagi fikrado sidoo kale.

Ilmahaaga ogaysii in **guusha dugsigu ay muhiim tahay** kuu tahay.

Hubso in ilmahaagu **uu yimaado dugsiga** maalin kasta.

Dhegayso, ku hadal, akhri, oo ku qor luqadda gurigaaga. Kobcinta xirfadahan luqaddaada guriga waxay taageeri doontaa akhriska ilmahaaga iyo fikirka.

Wada sheekaysigu waa muhiim. Ka hadal:

- Maalintooda dugsiga
- Buugta ay akhriyeen
- Khibradaad wadaagteen
- Sheekooyinka qoyska/sheekooyin kale oo la yaqaan

U akhri la akhri ilmahaaga maalin kasta.

- Akhri buugta la yaqaan ee ay xiiseeyaan.
- Ka dhegayso buugta cajaladaha/CD, kombiyuutarka, ama buugta elektarooniga ah.
- Ka hadl waxay akhriyaan. Waxa dhacay? Waxay barteen?

Wax la qor inta badan ilmahaaga. Fikradaha qaar waxa ku jira: Warqaddaha qoyska ama saaxiibada, liiska wax iibsiga, sheekooyinka ama diiwaanada joornaalka.

La same xirfada kelmadda Isticmaal warqaddaha caaga aha ama birlabta ah si loo kala saaro, habka ABC, isku aadi xarfaha waa wayn iyo kuwa yar yar, samee kelmado fudud, oo higaadi magacyada qoyska.